

KUMAA TAHAY?

Isbaro Aad Guuleysatide



Maxamuud Xuseen Maxamuud

KUMAA TAHAY?

Isbaro Aad Guuleysatidee

**Author: Mahamoud Hussein
Mahamoud**



Tusmada Buuga

Mahadnaq.....	4
Hibayn.....	5
Hordhaca qoraaga.....	6
Maxaa qabsatay oo guulo ah.....	7
Waa maxay guul.....	7
Tusaalo yar oo dhiiro gelin ah.....	8
Maxaa naga hortaagan inaan guuleysano.....	11
Kumaa tahay adiga.....	13
Sidee loo samaystaa hadaf/qorsho.....	15
Waa maxay mission iyo vision.....	17
Maxay dadka ugu fashilmaan gaarista yoolalkooda.....	18
Ka guuleyso caqabadaha.....	19
Sidee u heli kartaa wax walba oo aad u baahan tahay.....	20

MAHADNAQ

Waxaa mahad dhamaanteed iska leh eebbe ee anay
jirin cid la la bardhigo ama lamida cilmigiisa,
awoodiisa, naxariistiisa iyo raxmadiisa.

Adoomadiisa ku arsaaqay nimcooyin badan oo aan
la soo koobi Karin, ee ii suurto galiyey inaan qoro
oo aan isku dayo diyaarinta buugaan.

Waxaan marka labaad u mahadcelinayaan cid kasta
oo ka qayb qaadataay, ilana hawlgashay ee igu
dhiirigalisay inaan soo saaro si ay akhristayaashu
ugu faa'iidaystaan iyo cid kasta oo xiisaynaysa
akhriska buugaan.

HIBAYN

Waxaan u hibeyey waalidkaygii I koriye, kuna hawlanaa kobcinta garaadkayga, jidhkayga, iyo aqoontaydaba, gaar ahaan hooyadayda **khadiijo abdi abukar** iyoaabahay **Hussein mahamoud jim'ale.** Sidoo kale waxaan u hibeyey qofkasta oo doonaysa aqriska buugaan (**kumaa tahay**)....

HORDHACA QORAAGA

Ku soo dhawaaw walaalkayga/walaashayda
akhristaha ahow, kuna soo dhawaaw buugaan
magaciisu yahay kumaa tahay isbaro aad
guuleysatidee oo aan filayo inaad ka helidoontid.

Buugaan sida ka muuqata ciwaankiisa waxaan
diirada ku saarayaa shaqsiyada qofka, noocyada
dadka, sidoo kale buugaan wuxuu ka hadlayaa sidii
aad isku baran lahayd oo aad u noqon lahayd qof
isyaqanaa nafsadiisa ogna awoodihiisa.

Buugaan wuxuu kaaga jawaabi doonaa su'aalahaan

Kumaa tahay?

Waa maxay guul?

Maxaa iga hortaagan guusha?

Sidee ku heli karaa wax kasta oo aan rabo?

Bani'adamku illahay wuu karaameeyey, waana wax
qasab noogu ah inan kaga mahadcelino rabigeena

Oo aan u soo koobi Karin nimcooyinka uu nagu
manaystay, lakin dadku badanaa ma'oga oo waa ay

Ka qadsanyihiin nimcooyinka uu alle siiyey.

Hadaba su'asha waxay tahay

○ **Maxaa Qabsatay Oo Guulo ah?**

Dadku badanaa waxay dhahaan guul inaad gaarto
waxay ku xerantahay nasiibkaada ama in aad ka
dhalato qoys qani/taajir ah hadaba adigu isweydii

○ **Waa Maxay Guul?**

Jawaabta waad helaysaa hadii aad tahay qof guul
doon ah. Sidoo kale guushu waa wax u baahan in la
raadiyo wayo majirto guul iska imaada guul kasta
waxay ku imaadaa hadafyo laqorto islamarkaana
lagu dhaqaaqo fulintooda.

Hadafyadaadu waa in ay ku leeyihii hadafyo u baahan in lagu xaqijiyo waqtiyo yar iyo hadafyo u baahan in lagu xaqijiyo waqti dheer.

Aragtida layaabka leh ee dhalin badan aaminsanyihiin ayaa ah “anigu ma noqon karo taajir ama magaari karo guulo sababtoo ah kama dhalan qoys qani ah”, waana aragti dhalin badan ku kaliftay inay isdhiibaan oo quus ka muujiyaan nolol hadaba bilaw u tahay.

- **Waxaan rabaa akhristoo inaan ku sheego oraah dhiiro gelin ah oo aan naftayda ku dhiiro geliyo marka ay u weecato dhankaas----**

Qofka guul doonka ah marnaba dooq uma ahan isdhiibitaan, dadaal yari iyo aragti la’aan.

Wuuna umarayaa dadaal kasta oo uu ku xaqeejin karo yoolalkiisa.

Hadaba aan ku sheego oraahda tusaaleed oo aan naftayda ku dhiiro geliyo..

Tusaalaha aan naftayda u soo qaato inay isdhibin ayaa ah Kasoo qaad waxaad rabtaa inaad fuusho dabaq 40 biyaano ah waxaadna rabtaa biyaanada afartanaad. Wixaad ku tagi kartaa labo qaab oo kala ah wiishka inaad korto ama inaad jaran jarada ku tagto adiga oo lugaynaya, waa ay kala duwanyihiin labadaas qaab oo aad u kori lahayd biyaanada afartanaad. Hadii aan ka fiirino **xaga watiga** iyo **xaga waxyeelada caafimaad.**

Xaga waqtiga hadii aan ka fiirino wiishka wuxuu kugu gaynayaa waqtii yar, halka jarajarada aad ku tagi kartid waqtii dheer.

Xaga waxyeelada caafimaad ee sidoo kale ku kala duwanyihiin wiishka wuu ka saameyn yaryahay jarajarada, halka jarajarada waxyeeladayda caafimaad kamid yihiin daal murqaha ah, garaaca wadnaha oo saa'id noqda, tabardari i.w.m.

Dadku waa labadaas midkood.

Qofka ka dhasha qoyska qaniga ah waxaan ku
tusaalaynaynaa qofka dabaqa ka koraya wiishka.

Halka qofka ka dhasha qoys sabool ah aan ku
tusaalaynaynaa qofka dabaqa ka koraya jaran jarada.

Hadii aad dabaqa ka kortid wiishka ama jaran jarada
waad tagaysaa biyaanada aad rabtid.

Tusaalahaan wuxuu sheegayaa in aysan guushaadu
kaliya ku xerneen inaad ka dhalato qoys qani ah
balse dhankasta guul ka gaari karto ama ka dhalo
qoys sabool ah ama qoys qani ah.

Rabitaankada oo noqda mid xoogan, dadaalkada oo
noqdo dadaal dheeri ah, qaladadka oo aad ka barataa
capiro, waxay kuu horsaydayaan guulo la taaban
karo.

○ **Maxaa Naga Hortaagan In Aan
Guulaysano?**

Dadka badanaa su'aashaan way ka ganbadaan in ay ka jawabaan, laakin waa su'aal muhiim ah in aad isweydiiso hadii aadan hore isku weydiin.

Su'aashaan malahan jawaab qofkasta ku wada qancaayo waayo qofkasta anaga naga mid ah waxbaa ka hortaagan guushiisa uu qofka kale kaga duwanyahay, tusaale qofbaa laga yaabaa inuu guushiisa ka hortaganyahay asxaabta uu la socda, ama inuu leeyahay balwada xun – xun sida qaadka, tubaakada, sigaarka, xashiishka, i.w.m

Qofkasta waa inuu waqtii laqataa naftiisa uu isweydiyyaa waxyabaha ka hortaagan inuu guulaysto.

Kadib aqristoo waad helaysaa jawaabta.

Waa in aad qortaa dhamaan waxyaabaha ka
hortaagan guusha oo aad qortaa ayagoo taxan, kadib
waa inaad ku dadaashaa sida aad ku xalin lahayd
caqabadahaas.

Tusaale hadii aan ka soo qaato caqabada ka
hortaagan guusha waa adigoo saaxiib la'ah asxaab
aan fiicnayn, balwada, iyo adiga oo aan u
baraarugsanayn inaad guul gaarto.

Markaas kadib waa inaad xalisaa dhamaan
caqabadahaas, hadii aad asxaab la'ahayd asxaab
xun – xun waa inaad ku badalataa asxaab fiican,
hadii aad tahay qof daris la'ah maandooriyayaasha
noocyadiisa kala duwan sida (sigaarka, qaadka,
taabuuga, shiishada, i.w.m) waa inaad joojisaa
isticmaalkooda, sidoo kale hadii aadan u
diyaarsanayn inaad guul gaadho waa inaad u diyaar
garowdaa maskax ahaan iyo jir ahaan ba.

- **Kumaa Tahay Adigu?**

Khoraagii weynaa ee Ibrahim al faqi wuxuu u qeybiyey dadku inay 6 nuuc yihiin, hadaba aqristroo adiga lexdaas keebaa tahay.

1. Qof aan lahayn qorsho ama hadaf inta uu noolyahay, maalmuhu ee ku dhaafaan asiga oo aan wax qabsanin, hadii aad la sheekeysato dadkaas oo aad weydiiso waa maxay hadafkaaga, kugu jawaabayyo mar hadii aan noolahay igu filan.
2. Qof leh hadaf yaqaana waxa uu rabo inuu ka guul gaadho, balse aan aqoon wadadii uu mari lahaa gaarida guushiisa.
3. Qof leh hadaf yaqaana waxa uu rabo inuu ka guul gaadho, sidoo kale yaqaana wadadii uu mari lahaa gaaridooda, balse aan ku kalsoonayn naftiisa.

4. Qof leh hadaf yaqaana waxa uu rabo inuu ka guul gaadho, sidoo kale yaqaana wadadii uu mari lahaa gaaridooda, naftiisana ku kalsoon, balse isqaad qaada ama naftiisa buun buuniya.
5. Qof leh hadaf yaqaana waxa uu rabo inuu ka guul gaadho, sidoo kale yaqaana wadadii uu mari lahaa gaaridooda, naftiisana ku kalsoon, sidoo kale aan isqaad qaadin, balse qaata go'aamo fashaliya guulihiiisa.
6. Qof leh hadaf yaqaana waxa uu rabo inuu ka guul gaadho, sidoo kale yaqaana wadadii uu mari lahaa gaaridooda, naftiisana ku kalsoon, sidoo kale aan isqaad qaadin, qaata go'aamo waxtar leh, hadii uu guulo gaadho aan joojin tartarka sidoo kale guulo kale inuu xaqijiyo u qalab qaata.

Hadaba akhristoo waad ogaatay 6 qaab ee dadku yihiiin, waadna ogaatay lixdaas qaab ee dadka loo qeybiyo qofka aa ka tahay.

- **Su'aasha isweydiinta leh ayaa ah adigu ma leedahay hadaf ama qorsho?**

Hadaba hadii ay jawaabtaadu maya tahay, qaad akhristoo talaabooyinkaan oona ku dhaqan.

- **Fikir:** haa tani waa talaabtaada kobaad, fakir oo waqtii la qaado naftaada adiga oo kala sheekeysanayo waxa ay u baahantahay ama ay rabto inay hesho.
- **Go'aan:** kadib markii aad ogaatay waxa aad u baahantahay inaad ka miro dhaliso, qaado go'aan adag oo ah inaad rabto inaad ka guul gaadho hadafyadaada.
- **Qor:** u qor hadafyadaada sida ay u kala muhiimsanyihiin.

- **Sheegid:** u sheeg hadafyadaada dadka positive ka ah, dadka kugu dheero gelinaya ka miro dhalinta hadafkaga.
- **Qorsheyn:** qorsheey talaabada aad u qaadaysid ka miro dhalinta hadafyadaada.
- **Dhiirogeli naftaada:** ugu sheekeey naftaada waxyaabaha kuu qabsoomay, waayo tani waxay sababaysaa in ay xamaasadaadu marna hoos u dhicin oo aadan niyad jabin.
- **U dabaal dag:** u dabaal dag guul kastaa oo aad ka miro dhalisay, hana hilmaamin markasta in aad allah ugu mahadceliso waxkasta oo aad la kulanto guul/guuldaro.

Akhristoo talaabooyinkaan waa talaabooyinka aad u qaadi lahayd sida aad ku daji sanlahayd hadafyo ama qorshooyin cad.

**Hadaba si aad u sameysato qorshe nololeed
waxaad u baahantahay in ay kuu cadyihii
labadaan mission iyo vision.**

- **Vision:** oo ah aragtidaada ama riyadaada.
- **Mission:** oo ah habkii aad u hawl galaysid sidii aad ugu dhabayn lahayd aragtidaadii ama riyadaadii.

Tusaale: hadii aad rabto inaad noqoto macalin.

Inaad noqoto macalin waa aragtidaada amma vision kaga, lakin inaad u hawlgasho ka miro dhalinta aragtidaada ayaa ah mission kagii.

Hadii aadan lahay vision iyo mission waxaad la mid tahay qof doon ka xeenaya lakin aan aqoonin wadada saxda ah uu ka mari lahaa badda.

Inaad ka xayso doonta waa ay fududahay lakin
inaad garan weydo wadada saxda ah ee aad
marin lahayd doontii ayaa ah dhibaato weyn.

Hadaba akhristoo sameyso qorsho hadii aadan
lahayn qorshayaal oo ka dhig maalamahaaga
maalmo qurux badan.....

○ **Maxay Dadku Ugu Fashilmaan**

Gaarista Yoolalkooda?

➤ **Yoolalka oo ah kuwa lasaadaalin**

Karin: yoolalka waa in ay noqdaan kuwo
macquul ah, kuwo hagaagsan, la qiyaasi
karo oo la gaari karo. Haddii kale looma
tarjumi karo qorshayaal waxqabad leh.

➤ **Qorshaha oo aan horay loo sii samayn:**

qorshahaaga waa inaad qortaa adigoo kala
siinaya qorshayaasha koobaad iyo
qorshayaasha labaad, micnaheedu waa in
uu marnaba dooq kuu noqon isdhiibid,

hadii qorshaha koobaad ku fashilantid ka
shaqaysii qorshaha labaad.

- **Aamin la'aan:** sidoo kale waxyabaha
dadka badanaa ugu fashilmaan gaarista
yoolalkooda waa iyaga oo aan
aminsanayn inay ka miro dhalin karaan
yoolalkooda.

- **Ka Guulayso Caqabadaha.....**

nolosha ma ahaan karto bilaa caqabad,
qofkasta waxa uu la kulmayaa caqabad
laakiin qofkasta isku si uma arkaan caqabada.

Ka waran hadii nolosha ahaan lahayd bilaa
caqabad oo aad waxkasta oo aad rabto aad
heli lahayd adiga oo aan u dhibtoon u
rafaadin?

Dadku badanaa waxay u arkayaan inay tahay
wax fiican inaad hesho waxkasta oo aad rabto
adiga oo aan u dhibtoon, laakiin xaqiiqda

dhabta ah sidaas ma'ahan waxaad noqon
lahayd qof daciif ah, qof aan sheegan Karin
guulihiisa, qof aan wax ka fahansanayn
nolosha.

Caqabadaha iyo dhibaatooyinku waa qaybo
muhiin u ah nolosha oo ku siinaya khibrado.

Dhibaatada ugu weyn ee dadka haysata

Suurtagal ma'ahan inaad noqoto qof qabiir
ah, qof garaad leh, hadii aadan la kulmin
caqabado.

○ **Sidee U Heli Kartaa Wax Walb Oo
Aad U Baahantahay?**

Wey fudutahay in aad ogaato waxa aad u
baahantahay,laakin waa arin adag marka ay
timaado sidii lagu heli lahaa, in aad hesho
wixii aad rabtay wey ka adagtahay ama ka
fudutahay sida aad u maleyneysay,

qeybta hoose waxaa aan kaga doodi doona habab kuu sahli kara inaad hesho wixii aad rabtay.

Mid ka mid dadka wax ku qora website-ka “Quora” ayaa la weydiiyey “sidee ku heli karaa wax walbo oo aan rabo? , waxa uu ku jawaabay ” dabcan qaabka ugu fudud ee looga jawaabi kara su'aashaasi waxa ay tahay in aan dib u qorno su'aasha oo aan ka dhigno “sidee baan ugu qalmi karaa in aan helo wax walbo aan rabo?.

Dhab ahaantii waa shaqo adag, hase yeeshee inaad hesho wax walbo oo aad u baahantahy kaliya lacag kama hadleyno,waxa aan ka hadleynaa dhinacyada kala duwan ee nolasha sida farxad, xiriir wanaagsan, guur fiican, shaqo fiican, waad heli kartaa xitaa lacagta, kaliya waa inaad xasuusnaataa hal arin oo ah “waxa aad aaminsantahay”..

Hoos waxaa ku qoran qodobo kugu gacan
siin kara safarkaada dheer ee aad ku
raadineyso waxa niyadaada ku jira, waliba
waxa aan kuu sameynayaa damanaad qaad ,
waxa aad adiga hadda raadineyso qof kale
ayaa horay ugu guuleystay, iska hubi in aad
fulisay dhamaan qodobada sida ay u dhan
yihiin.

1#. Hadii aad aaminsantahy waad gaari kartaa

Midabka maqaarka jirkaaga muhiim ah,
muhiim ma ahan goobta aad ku dhalatay ,
muhiimna ma ahan qaraabadaada iyo qoyska
aad ka dhalatay, arinta kaliya ee muhiimka ah
waa “Adiga iyo waxa aad aaminsantahay”.

Iska hubi aaminaataada in ay tahay “Wax
walbo waa dhici karaan” waa kan xadiithkii
rasuulka SCW ee macnihiiisu ahaa

“Ilaah waxa uu qofka siiyaa waxa uu
aaminsanyahay”.

- Xadiith Qudsi

Henry Ford waxa uu ahaa ninkii ugu
horeeyey ee Ameerikaan ah oo sameeya
warshad baabuurta sameysa, eradayada lagu
xasuusta waxa ka mid aha murtidiisa caanka
noqotay ee aheyd

“hadii aad aaminsantahay in aad sameyn
karto ama aad aaminsantahay in aad sameyn
karin labaduba waad saxantahay”.

Henry waxa uu aaminsanaa in muhimaadda
qofka iyo helitaanka wixii uu rabay ay ku
xiran tahay oo kaliya “Waxa uu
aaminsanyahay”.

Sidee buu u guuleysanaya qof aaminsan
waxyaabo uu isaga iska dhaadhiciyey sida
“fursad ma haaayo”, “meel xun ayaan ku

noolahay”,”Lacag aan isku furdaamiyo ma haayo”, ogow waxyaabahan aad isku sheegtay waxa ay noqon doonaan “run” maxaa yeelay waad aaminsantahay,

Dadka aaminsan in ay sameyn karaan “Wax waliba” waxa ay u bareeraan qataraha, waxa ayna sameeyaan Isku Day, xitaa hadii aay waayaan hadafkoodii weynaa, horay ayey u socdaan, waxa ayna ka soo tagaan EBER waxa ayna gaaraan Heer, waxa ay ka soo tagaan rajo xumo, waxa ayna hiigsadaan Guulo.

2#Ficil Sameey

Aaminaada oo kaliya naguma filna, si aan u helno wax walbo oo aan u baahanahay waa in dhaqaaq sameynaa, markase aan ka hadleyno Ficilka waxaa jira quraafaad da’ah oo dadka intooda badan ay aaminsanyihiin taasi ah ah

“Waxaan sugayaa intii waxa iskukey
toosaan”

Jooji , waxaan ku xaqiijinaya in aysan jirin
maalin ay wax walbo iskukaa toosi doonaan,
mar walbo arin unbaa khaldan, sidaa darteed
markii ugu fiicneyd ee aheyd in aad howsha
bilwoda waa sanadkii hore, hadii taasi aysan
dhicin waqtiga kale waa hadda, hadda bilow,
waxaa jirta maahmaah shiineys ah oo
dhaheysa

“Waqtiga ugu haboon ee geed in la beero ay
aheyd waa 20 sano ka hor, waqtiga labaad ee
ugu fiican ee la beeri karo waa hadda, hadda
beer”

3# Isku Dayga Ha Joojinin

Muhiim ma ahan qaabka ay ku socoto
nolashaada qaab xun mise qaab wanaagsan,
waxaa laga yaabaa in aad raadineyo
cudurdaar si aad howsha u joojiso, ogow
waxaa fiican in fikirkaasi aad ku badalato
mid kale oo ka soo horjeeda kaasi oo ah
“raadi cudurdaar si aad howsha u sii wadi
karto”.

Dadka waxa ay ku sheegi doonaan kun
sababood oo ay habboontahay in aad joojiso
waxa aad ku fikireyo, diyaar ma u tahay in
codadkaasi aad maqasho.

Dooqa adiga ayaa iska leh Waxaa dhici
kartaa in guushaada ay ka dhawdahay sida
aad fileyso, howsha wad, hana niyad jabin.

waa kan Albert Hubbard oo ah feylasoof

Mareykanka waxa uu na leeyahay

“Ma jirto guuldarro aan ka aheyn in aad
joojisay Isku Dayka”

Waxa aan ku dhaxnoolnahay bulsho dag dag
ka sameysan, markii wixii aan rabnay aan ku
heli weyno si dhakhso ah cabasho ayaan
bilownaa, laakiin runtu waxa ay tahay wax
wanaagsan waxaa hela dadka wax sugta waa
halka ay soomaalida tiraahdo “Ma Sugto
mahar ma leh” sidoo kale soomaalidu waxa
ay ku maahmaahdaa.

“Ninkii Sabra ayaa Sad Hela”.

DHAMAAD